




Home Link - Somali



Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 6aad: Waxyaabaha Kora: Todobaadka 1

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan ilmahaagu wuxuu wax ka baran doonaa waxyaabaha kora. Isku day ugu yaraan saddex ka mid ah hawlaha waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhti yar oo cunugaagu wax ka baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee gudaha sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: _____

Iluuqada

Maxaa ka koraya deriska:

(Related to *Zinnia's Flower Garden*)

Socod ku wareeg xaafadaadaada kuna arag waxyaabo kala duwan oo soo koraya sida ubaxa, dhirta, beeraha deriskaaga, waxaa laga yaabaa in xataa dhallaanka ku jira! Sawirro ka qaad waxyaabo koraya. Ku martiqaad ilmahaaga si aad u sawirto oo kuu sheeg waxa s / uu ogaaday.

Wadahadalka bilaabanaya:

1. Maxaad aragtay?
2. Maxay qabtaan waxyaabo kala duwan (dhirta, xoolaha, dadka), una baahan yihiin in ay koraan?
3. Maxaad jeceshahay in aad kororto? Waa maxay sababtu?

Xisaabta

Xisaabi iyo oo Hore iyo Dib u Dhaqaaq:

Ku billow kambadhuudh oo si tartiib tartiib ah u kac ilaa aad istaagayso adigoo kor u tirinaya ilaa 10 ama ka badan. Kadibna, dib ugasoo tirinaya 10 ama ka badan, si tartiib ahna dib u soo degaya.

Dhaqdhaqaaqa Weyn

Meertada Noloshaha ee Geedka:

(La xiriira *Zinnia's Flower Garden*)

Weydii ilmahaaga nooca geedka uu jeclaan lahaa inuu noqdo. Iska dhig in ilmahaagu uu yahay iniinta adna aad tahay beerwalaha Ku beer iniinta (ilmaha) dhulka, ku dabool ciid, ku rushee biyo, oo ku diiri falaaraha qorraxda. Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu u dhaqmo sidii mid koraya oo kadibna u koraya ubax ama geed, ama geed qudaar ah. Isku beddela doorarka.

Bilaabayaasha Wadahadalka:

- Waa maxay nooca geedka ee aad tahay?
- Maxay tahay waxa ugu horreeya ee u baahan inuu dhaco? Maxaa dhacaya intaa kadib?

<p style="text-align: center;"><u>Hadal iyo Akhris Wadajir Ah</u> (20 daqiiqadood)</p> <p>Bilaawayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad u maleyneysaa in buuggani uu noqon doono? ● Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada? ● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada? ● Maxaad u maleyneysaa inay dhici doonto marka xigta? ● Waa ayo matalaha aad jeceshahay? 	<p style="text-align: center;"><u>Lugada</u></p> <p>Waa Maxay Waxa Ka Koraya Xaafadaha: (La xiriira <i>Zinnia's Flower Garden</i>)</p> <p>Dhex lug ee xaafadahaaga oo arag waxyaalaha kala duwan ee koroya sida ubaxyada, dhirta, beeraha deriska, laga yaabaa xitaa dhallaanka! Sawirro ka qaad waxyaabaha koraya. Ku martiqaad ilmahaaga inuu wax sawiro oo uu kuu sheego waxa uu/ay ogaaday/ogaatay.</p> <p>Bilaabayaasha Wadahadalka:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Maxaad arragtay? ● Maxay waxyaabaha kala duwan (dhirta, xayawaanka, dadka) ugu baahan yihiin inay koraan? ● Maxaad jeclaan lahayd inaad koriso? Waa maxay sababtu?
---	---

Buug-Gelinta Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtu waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha ee xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan waxyaabaha koraya.

Isniin _____ Talaado _____ Arbaco _____ Khamiis _____ Jimco _____ Sabti _____ Axad _____

<p><u>Buugaaga aan ku akhrino dugsiqa:</u></p> <p><i>Zinnia's Flower Garden</i> oo ay qoray Monica Wellington</p>	<p><u>Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aad jeclaataan:</u></p> <p><i>The Tiny Seed</i> oo ay qoray Eric Carle <i>Planting a Rainbow</i> oo ay qortay Louis Elhert</p>
--	--

Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasiloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, “**Bouquet** waa koox ubaxyo ah oo lasoo xushay oo loo isku xirxiray ama lagu riday weel.”
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, “Sidee ayay Zinnia u daryeeshay beerteeda?”